# Immune globulin loogu talagalay Kahortagga Khatarta Jadeecada Ka danbaysa

*Immune globulin loogu talagalay Kahortagga Khatarta Jadeecada Ka danbaysa (IG PEP) waa inaan loo isticmaalin xakamaynta marka jadeecadu dilaacdo, laakiin badalkeeda waa in lagu yareeyaa khatarta caabuqa iyo dhibaatooyinka culus ee uu gaarsiin karo bulshooyinka nugul.  Bixiyeyaasha daryeelka caafimaadku waa inay bixiyaan PEP-ka jadeecada ee ku haboon ayagoo la shaqaynaya waaxyaha caafimaadka ee deegaanka ama gobolka.*

## Waa maxay kahortagga khatarta jadeecada ka danbeysa ee loogu talagalay jadeecada?

Kahortagga khatartaka danbaysa jadeecada (PEP) ee jadeecada, markii si degdeg ah loo bixiyo kaddib marka ugu horeysa ee khatarta jadeecadu timaado, wuxuu keeni karaa difaaca caabuqa jadeecada ama wuxuu yarayn karaa khatarta xanuunada culus ee soo gaaraya dadka nugul.

Waxaa jira laba nooc oo PEP-ta jadeecada ah:

1. Talaalka MMR, haddii la siiyo **72 saacadood gudahood** marka ugu horeysa ee khatartu dhacdo (waa sida la doorbidayo)[1]
2. Immune globulin (IG), oo sidoo kale loo yaqaano immunoglobulin, waxaa loo qoraa **6 maalmood gudahood** laga bilaabo khatarta koowaad ee jadeecada, taasoo inta badan loo kaydiyo bulshooyinka nugul.

## Waa maxay immune globulin?

Immune globulin (IG) waa milan nadiif ah oo ay kujiraan antibody-yo laga keenay dhiiga dadeed. IG waxaa muhiim looga dhigaa markii xiriir dhow lala sameeyo kiis jadeeco ah oo aan qaadan karon talaalka jadeecada, qaamo-qashiirka, iyo rubella (MMR) khatarna u galay jadeecada. Dadka aan qaadan karin talaalka jadeecadu waa:

- plmaha ka yar da'da 6 bilood
- haweeneyda uurka leh (inkastoo dumarka ilmaha nuujianaya ay qaadan karaan MMR)
- dadka difaacoodu aadka u liito ama dadka caafimaadkoodu ka hor imaanayo talaalka

IG PEP waa inaan loo isticmaalin xakamaynta marka jadeecadu dilaacdo, laakiin badalkeeda waa in lagu yareeyaa khatarta caabuqa iyo dhibaatooyinka culus ee uu gaarsiin karo bulshooyinka nugul. IG waxaa muhiimada loo siiyaa ilmaha ka yar 12-ka bilood ee aan lahayn difaaca jadeecada, dumarka uurka leh ee aan lahayn wax cadaynaya difaaca jadeecada, iyo dadka difaacoodu aadka u hooseeyo kuwaasoo xiriir dhow la sameeyay kiis jadeeco ah oo la xaqiijiyay. IG waxaa la siin karaa dadka kale ee aan muujinayn difaaca jadeecada, laakiin waa in muhiimadda la siiyaa kuwa khatarta u galay ayagoo jooga goobaha uu ka dhaco xiriirka mudada dheer ah, dhow (sida, guriga, xanaanada caruurta, iyo fasalka).

---

[1] Qofka talaalka u qalma ee 12 bilood jirka ah ama ka weyn oo jadeecada khatarta u galay, waxaa loo doorbidayaa in loo qoro talaalka MMR ayadoo la isticmaalayo IG, haddii loo qoro 72 saacadood gudahood marka koowaad ee uu khatarta galo. Haddii khatartu aysan caabuq keenin, talaalka khatarta ka danbeeya ayaa keeni kara difaac ka dhan ah khataraha danbe ee jadeecada asagoo sidoo kale siinaya difaac ka dhan ah caabuqa qaamo-qashiirka iyo rubella.

Dadka intooda badan falcelin kama sameeyaan IG, saamayntiisa aan wanaagsanayna waa mid kooban. IG ma ahan talaal waxayna bixisaa difaac mudo gaaban ah oo jadeecada ka dhan ah kaasoo soconaya qiyaastii 3-4 todobaad. Dadka qaata IG PEP una qalma talaalka MMR waa inay sugaan ugu yaraan 6 bilood kahor intaysan qaadan talaalka MMR.

## Sidee IG loo isticmaalaa?

IG waxa aloo baahanyahay in qofka la siiyo **6 maalmood gudahood kaddib khatarta koowaad** waxaana laga qaadan karaa muruqa (IGIM) ama xididka (IGIV).

### Immune Globulin-ta **muruqa (IGIM)**

GamaSTAN ayaa ah IGIM-ta kaliya ee laga heli karo Maraykanka. Waxaa la bixiyaa ayadoo ah 2mL iyo 10mL oo hal mar la qaadanayo. Waxaa lagu kaydiyaa heerkul ah 2-8°C (36-46°F) waxayna noolaan kartaa 3 sanno.

- GamaSTAN waxaa loogu talagalay cacruurta miisaankoodu ka yaryahay 30kg (~66 bawn), khaasatan kuwa ka yar da'da 1-ka sanno xiriir dhowna la yeeshay kiisas iska diiday ama aan u qalmin qaadshada talaalka MMR.
- Kuurada loogu talagalay ee GamaSTAN waa 0.5mL/kg, bayadoon loo eegayn xaalada difaaca qofka la xiriiray. Kuurada ugu badan mug ahaan waa 15mL.
- GamaSTAN waxay noqon kartaa mid caqabad leh in loo qoro caruurta miisaankoodu ka badanyahay 10kg sabab la xiriirta qoristeeda oo badan una baahan irbado waaweyn oo badan oo kala duwan. Looguma talagalin dadka waaweyn; dadka ≥30 kg waxay u baahanyihiin immunoglobulin xididka laga qaato.

### Immune Globulin-ta **xididka (IGIV)**

IGIV waxaa loogu talagalay dadka miisaakoodu ka badanyahay 30kg (~66 pounds).

- Kuurada lagu talinayo ee IG xididka laga qaato (IGIV) waa 400 mg/kg.
- IGIV PEP waxaa loogu talagalay (Ingiriisi) dadka khatarta badan ugu jira jadeecada daran iyo xanuunada culus, waxaana kamid ah dadka difaacoodu aadka u liito iyo dumarka uurka leh ee aan lahayn cadaynta difaaca jadeecada kuwaasoo jadeecada khatar u galay.
- Inkastoo kuuro IGIV ah oo ka badan midda IGIM ah la qori karo, haddana caafimaad ah isticmaalka IGIV waa mid faa'iido yar, waxaana kamid ah kharshkiisa oo badan iyo qoristiisa oo u babahan in xirfadle aqoon u leh uu goobo gaar ah qofka kula socdo (sida, goob isbitaal ah).

| Bulshada | Nooca PEP ayaa diyaar ah |
|---|---|
| **72 Saacadood gudahood marka khatartu timaado** | |
| Ilmaha iyo caruurta ka weyn ≥ 6 bilood da' ahaan | Tallaalka MMR |
| Dadka waaweyn ee aan uurka lahayn ama difaacooda jirku aadka u liito | Tallaalka MMR |
| **6 maallood gudahood markka khatartu dhacdo** | |
| Ilmaha 6-da bilood ka yar | IGIM (MMR laguma talinayo) |

| | |
|---|---|
| Ilmaha iyo caruurta ka yar 30kg | IGIM (waxaa si guud muhiimada loo siiyaa ilmaha <12 bilood ka yar da' ahaan ee aan awoodin qaadashada MMR PEP) |
| Haweenka uurka leh | IGIV (MMR waa mid aan la qaadan karin xiliga uurka) |
| Dadka difaacooda jirku aadka u liito | IGIV (MMR lama qaadan karo) |

## Sida IGIM loo Helo

IGIM uma baahna xarun la iskaga shubo ama in isbitaal laga qaato, laakiin isbitaalada deegaanka ayaa hayn kara kuurada la isticmaalayo, haddii loo baahdo.

### **Kahor** intaan kiisaska la ogaan

1. Samee qorshe aad ku helayso IGIM, khaasatan haddii ay jiraan meelo MMR ku yaryahay. IGIM lagama heli karo barnaamijka Vaccines for Children (VFC, Talaalka Caruurta). Kala xiriir sarkaalkaaga mashruucaa Ceners for Disease Control and Prevention Immunization Operations and Services Branch (CDC, IOSB, Laanta Adeegyada iyo Howlgalada ee Xarunta Kahortaga iyo Xakamaynta Cudurada) si uu kuu caawiyo hadaad u baahantahay.  2. La shaqee isbitaalada maxaliga ah ama nidaamyada isbitaalada si aad u ogaato kuurooyinka la heli karo.

3. Waaxyaha caafimaadku waa inay sidoo kale tixgaliyaan helitaanka kuurooyinka tooska loogu isticmaalo hadii loo baahdo khatarta jadeecada ama marka ay dilaacdo.

Waaxyaha caafimaadku waxau saaxiibada qaybiya IGIM kala shaqayn karaan helisteeda.

Gobolo badan ayaa xubin ka ah Ku shubista MMCAP (Ingiriisi); waaxyaha caafimaadka iyo gobolka iyo deegaankuba way soo iibsan karaan GamaSTAN/IGIM oo ah heer qandaraas oo laga helayo kooxda qaran ee iskaashatada ah. Si ada u bilowdo Shubista MMCAP, xiriirada goboladu waa kuwaan: https://infuse-mn.gov/products/product-ordering/index.jsp (Ingiriisi).

### **Kadib** markii kiiska la ogaado

1. Kala shaqee isbitaalada ogaanshaha kuurada markaas diyaarka ah.
2. Haddii isbitaallada deegaanka aysan haysan qiyaaso ku filan oo tallaalka ah, isla markaana aan laga heli karin meel kale, la xiriir qaybiyeyaasha MMCAP Infuse ama wakiilka soo saaraha (macluumaadka soo saaraha halkan ayaa laga heli karaa: https://www.gamastan.com/en/hcp) (Ingiriisi).

Ogsoonoow: Dalabaadka sida dhakhsaha ah loo buuxinayo, akoon MMCAP waa in lasii sameeyaa.

## Sida IGIV loo Helo

IGIV waxay sida caadiga ah taalaa isbitaalada waaweyn iyo xarumaha caafimaadka ee magaalooyinka waaweyn. Markii ay wadanka ku yaraato, isbitaaladu waxay u baahan karaan inay bukaanada muhiimad kala siiyaan.